IRBADDII EELKA REEBTAY

CABDILLAAHI SAALAX AXMED

IRBADDII EELKA REEBTAY

***

Murugo oo idil ayaa igu dhan. In kabadan intaan naftayda u cadhaysanahay ayaan bulshada u ciil qabaa. Urugada iyo uur-ku-taalladu se waa igu keligay. Sidaan qabo ma jiro qof soo jeeda xilligan dambe. Waase jaanis fiican oo aan naftayda kaga takhalusi karo! Hayla yaabin toddobadii bilood ee u dambaysayba saasaan ahaa. halgan ayaa aniyo naftayda noo dhexeeyay. Jidhka iyo maskaxdaydoo dhanbaa is diidan. Xidhiidhadaa iska hor imanayana waxaa ugu culus loollanka wadnaha iyo maskaxda ee dhexdayda ku hirdamaya. Go'aanada culus degdeguna ka muuqdo ee qalbiga ka imanaya ayay maskaxdu kala shaandhaysaa ,caqli ku darna tidhaahdaa. Caqli-ku-dartaa muddaan mawdaka kaga baxsanayay.

Habeen kasta tashigaasaan la noolahay, hal rejo ayaa se waaberiga i gaadhsiisa. Haa, hal keli ah, taasina waa arkidda naftan aan agjoogeeda xiiseeyo. Toddobadii

biloodba dartii inaan u noolaa iyo in mawdku iga soo habsaamay ayaan garan lap'ahay.

subaxa isma aragno, oo faquuqa walbahaarka igu abuuray ee bulshada igaga imanaya ayaa na kala qariyay. Galbaha qaarse ayaan ugu tagaa cusbitaalkan xaafada ee dhowaan loo soo wareejiyay. Isaga ayaa igula taliyay imaanshiiyaha galabtii. naxariistu waa mid kamida dabeecadahiisa wanaagsan ee tira beelka ah.

Shalay aroortii ayaan u tegay , foolkayga ayuuna murugada ka akhristay. Sidee wax u jiraan ayuu u igaga naxsaday, anoo weli aamusan ayuu : ma waddadii baad soo martay yidhi. madaxaan u ruxay. Dejinta xaaladayda ayuu isku hawlay isagoo niyada ii dhisaya, jahliga bulshadana dhinacyo badan iga tusaya.Waxaasoo dhan se waxaan ku illaawaa kaftanka iyo dhoolla-cadayntiisa bilaashka ah ee aan ka waayay kuwan dudaya uun , ee aad moodid colaadintayda inay u bahoobeen.

Saaka waxa iga cadhaysiiyay hadduu i waydiiyay. waxaan u sheegay inaan marayay wadiiqada yare e xaafadayada ka dambaysa, waxaa meel hortayda taagnaa saddex hablood oo aan labo garanayay. deris baanu nahay, waxaanan ka warqabaa inay dhigtaan jaamacadda aqbala. Kulliyada caafimaadka ayay dhigashadeeda ku guda jiraan. Inantan saddexaad se ma garanayo, kollay waa isku jaamacad oo waakuwaa bus-kii sugaya . WAA TAA! ayaa igusoo

duushay anoo ag maraya. ayo hadday ugu jawaabeen iyagoo jalleecidoodu la socoto waxay ugu hal-celisay , waa tii bugtay! inantii cusbayd baanay u sharraxday xanuunkayga iyadoo u haysata inay la faqayso. Codkeedu wuu isoo gaadhayay, cadhadiina maku leexataa ayaa igu soo dhacday. haddana talooyin badan oo dhakhtar isiiyay ayaa maskaxdayda ku soo dhacay. waxaan naftayda ku qanciyay inaan hadalkaygu waxba tarayn, bal e buuq sii abuurayo. waxaan kaloo sii ogahay cadaalad xumada maxkamadda bulshadu i saarayso iyo eexda ay igula kacayaan.

Dhinac baan isu barbarriyay , anigoo derbiga raacaya iskana dhigaya in aanan maqal hadalkooda. kolkaan Axmed u sheegayna intii karaankiisa ahayd wuu i dejiyay , xanuunku qaddar eebbe inuu yahayna wuu ixasuusiyay. Axmed waa qofkii ugu horeeyay ee iga waraystay xaaladayda beryahan dambe.
indho shaki leh iguma eego, sida uu ii dhuganayo ayaad ka garata inuu dhuuxayo hadalkayga. taasi waa ta igu dhiirisay inaan u xaal-warramo.

Waan hubay qof kasta oo bulshada ka mid ahi inuu khalad igu xukumayo , mid nafteeda dayacday, waraabayaasha baylah u noqotayna igu caayayaan. marna se halkan masoo dhigan mihnadlayaal caafimaad baa ku takooraya, shaqaalihii Aqbala haw badnaadeene.
Axmed se markaan u imid ee suaalaha hordhaca ah i waydiiyayba waxaan dareemay nefisaad. waxaan guda

galay sharraxaado aan beryo ku dhiirran waayay, markaan soo hadal qaadona la odhan jiray waa beenteed. suaalaha aan abid layga rumaysan ee uu madaxa u ruxay waxaa ka mid ahaa sideed xanuunkan ku qaaday? goorma ayaa lagugu sheegay? Iyo qaar kaloo badan oo igu dhalinaya bilaabidda sheeko dheer. Sheeko iga dhigtay tuke baalcad. waxaanan uga bilaabay :

…Waxaan ahayn qoys danyar ah oo deggan mid kamid xaafadaha isku-raranka ah. Aabahay wuxuu ahaa sariir-yaal xanuuno jilciyeen macaan iyo dhiig-kar ayaa dhulka dhigay, da'ina waa u raacday xanuunka. Hooyaday waxay meherad yar oo ay shaaha ku kariso ku haysatay meel aan gurigayaga saddexda qol ah ka durugsanayn, Aniga ayaana wax carruur ah u joogay.

Iskuulka fasalka Afraad ee dugsiga sare markaan u gudbi lahaa ayaan iskaga hadhay, caawinta qoyska oo layga maarmi waayay darteed ; Sababo dhaqaalena waa jireen. Waxaan bilaabay in aan nadiifiso ka noqdo cusbitaalka xaafada ku yaal, oo aan labada gelin oo wakhti u dhexeeyo ka hawl-geli jiray. Wax baa iska bedelay dhaqaalihi xaafada, hooyo ayaanan ku qanciyay inay iska dhaafto shaqadan karinta shaaha, aabbona ka war hayso.

Muddo hadaan shaqadii waday ayaa duhurnimo salaasa ah farriini i soo gaadhay, anoo cusbitaalkii jooga qashin irabdo ubadan oo ururi laygu yidhina faraha ku haya. waa hooyo, degdeg baan taleefanka uga qabtay, waxaanay ii sheegtay in aabbe aad u xanuusanayo dhakhsona laygu baahanyahay. Werwer hor leh ayaa igu bilowday, waxaanan bilaabay dedejinta hawshaan faraha ku hayay. Wixii aan tiigsan karayay ee saaraa miiska ii dhow ayaan gacanta soo mariyay. siriinjyo miiska saaraa oo bilaa fur ahna waan haab-haabtay, inaan daboolona damcay kahor intaanan qashin-qubka ku ridin. si lama filaan ah ayaan isu dhaafiyay irbadda iyo daboolkeedii afka dhumcda yar lahaa, waxaana i damaqday irbada fartayda ku libidhay laftana kaga sanqadhisay. AX! AX ! waan iska saaray dhiig badanbaana iga butaacay. waxaan u cararay dhanka cusbitaalka gudihiisa, markiiba waa lay dabiibay oo waxa laygu dhejiyay BALASTAR! si dhiigga loo joojiyo. Waxaan maamulka u sheegay in aan fasax u baahanahay aabbahayna xanuusanayo , sidii baanan kaga soo baxay cusbitaalka.

Xaafadda haddaan soo gaadhay , waaba xaafaddii oo lagu buuqsanyahay. inyar markaan usoo jiray ayaa werwer igu bilowday. shaydaanka ayaan iska naaray horena usoo taabacay.
Gudaha markaan soo galay ayaa islaani gacanta i qabatay docna iila baydhay. waxaan damcay inaan iska dhufto,

rabadh ayay se igu noqotay. qol lagu buuqsanyahay ayaa indhahaygu ku maqanaayeen. sawaxanka ayaa dhegahayga soo gaadhayay fikrado badana maskaxdayda ku carinayay.

Hadal badan ayay islaantii is daba dhigtay waxaan se ka fahmay "HOOYO NOOLEBA WAA DHINTE , ILAAHAY AABBO HAW NAXARIISTO SAMIR IYO IIMAANA HAYNAGA SIIYO ".

DHINTE AA! , YAA DHINTAY!, AYO! , KUMA! … AABBO MEE!!.

Waan soo cararay waxba se ma qaban karayn. qolkii haddaan soo galay oohinnaad moodid in layla sii sugayay ayaan isku jiibinay.

Bilo ayaa ka soo wareegay geeridii aabbo. noloshayadu way is bedeshay cidlo aan qiyaas lahaynna waan dareenay. aniga iyo hooyo ayaa isu hadhnay. waan is weheshannay, waxkastoo ay ii ahaydna laba jibaarkeed baan isu noqonay. Dhowr goor ayaan kula taliyay inay iska nasato shaqadana iska dayso , way se iga diiday oo bil ka dib geeridii aabbo-ba waxay dib u furtay meheraddii shaaha.

Sidii bay hawluhu u socdeen farxadduna way isasoo taraysay. waa aduunyada oo shalay murugay noo ahayd ,

maanta waannu soo kabanaynaa, berrina xagga allay nagaga maqantahay.

…Casar gaaban bay ahayd markaan shaqada kasoo rawaxay. Anoo aad u daalan ayaan usoo luuday xagga xaafadda. Waxaan soo maray meheraddii hooyo si aan isu sii raacno inta aan makhrib la eedaamin ka hor. Haddaan meheraddii soo gaadhay waabay xidhantahay! Waxan maanta hooyo dedejiyay waamaxay. anoon axadna waydiin ayaan qumaati u abbaaray gurigii.

Laba sekadood ayaan kasoo laabtay, waxaanan kusoo dhacay waddo halbowle ah oo xaafaddayada hor marta, toosna ii gaynaysa. tii baan soo qaaday.

Waa maxay hugunkaasi! waa meel iga horaysa oo lagu ururs anyahay. Bal hore u dhakhso aad ogaatid e' ayaan iskula xanshashaqay. Markaan usoo dhowaaday sidii niyadu igula faqaysay bay noqotay, oo shilbaa meesha ka dhacay, Gawaadhi se ma arko. sidee wax u jiraan! hore ayaan usoo taabacay, ugu dambayna,waan soo gaadhay.

Dhiig aan yarayn ayaa waddada meel koonaheeda ah ku yaala, dadkuna ku xoonsanaayeen. Madaxa ayaan kala soo dhex mudhay tobanaan qof oo meesha taagnaa. Mise qof ba meesha ma yaalo ee waa dhiig keliya!!

dadkii warsaday , waxaanay ii sheegeen in qof dumara meesha gaadhi ku jiidhay. Wadnaha ayaa hoos ii ruqay. Waxaanan sii faduuliyay " oo ayo ah ",qof se tilmaan aan dumarnimo ahayn isiiya waan waayay. " mee qofkii ayaan ugu daray "waxay iigu hal-caliyeen dhowr daqiiqo kahor ayaa ambulance-ku qaaday, cisbitaalkaana waa loola cararay.

Maan sii warraysane anoo sidii u naxsan ayaan xaafadii beegsaday. Dhowr sekadood baan dhaafay xaafadiina waan soo gaadhay, mise waa xidhantahay! naxdin weynaa. xaafadii deriska ee aanay weligeed bariidada lasoo dhaafin ayaan isku sii daayay, Hooyo ma aragteena kaga naxsaday . Maya ayaan iyagana kala kulmay.

Orodkii aan soo qaadnay aniga iyo labadii hablood ee xaafadii deriska igasoo raacay cusbitaalka ayaan ku nimi; Qolka Emergency-gana degdeg ayaan u tagnay. Waxaan soo qabtay mid kamid kalkaalisooyinkii si aan u warsado qofka meesha la keenay. Markiiba waxay ii sheegtay in cid loo la'aa bukaanka, qalliin lagu samayn lahaana dib loo dhigay kadib markii dadkeedii la waayay. Anoo ilmaynaya ayaan degdeg qolkii u galay, Mise Waa HOOYO. illeen naxdin looma dhinto! Sidii aan u ooyay maalintaa weligay intaan xasuusnahay uma ooyin, maalintii aabbe dhintayna ku daroo.

Hooyo koomay ku jirtay. shilku lugta bidix oo ilaa misigta dherersan ayuu kasoo gaadhay, madaxana nabaro aan yarayn ayaa kaga dhacay. Muddo yar ka diba waxa nasoo gaadhay dhakhtarkii wuxuuna ii sheegay in la doonayo in dhiig loo shubo, cabbaaradana la la'aa cid ay isku dhiig yihiin.
Wuxuu isagoo niyada Ii dhisaya igu yidhi " adeeero waxaan ku rejawaynnahay in hooyo caafimadayso ee kaalay dhiigaaga hala tijaabiyee". Waan soo daba galay dhiigiina iga qaade. meel aan ka durugsanayn ayaan fadhiistay. Waxay guda galeen hawshii looga baahnaa. daqiiqado kadib,waxaa wejigooda ka muuqday madow aan kolkii hore laga dareemayn. Dareen-eegis dheeraada ah ayaan siiyay, anoo hibitiqaya ayaan ku idhi " isku dhiig ma nihin?!!" "May ee naga war sug"bay dheheen.

Madax ayay isla galeen , hoos bay hadalo isu waydaarsadeen , orod badanina waa ka dhacayay. shaqa culus oo dhakhso ah inay hayaan ayaad dareemi karaysay. hawshaydii inay ka faraxasheen baan xaqiiqsaday. waa kan dhakhtarkii dhukurnaa ee markii hore niyada ii dhisay igu soo socda " adeer isku dhiig baad tihiin , iminka se dhiigga lagaa shubi maayo e qofkale waa in aan dhakhso u doonnaa, innagoo ku xisaabtamayna waqtiga yaree aynu haysano.."

waan naxay runtii , waxaan weydiiyay oo sababma! maxaa diidaya dhiigayga?
“Waynu ka wada hadli adeero ee niyada khayr u sheeg” ayuu iyidhi, isagoo ii muujinaya degdeg iyo muhiimada hawsha uu hayo. Muddo ayay nagu qaadatay inaan soo hello qof hooyo la dhiig ah. Ugu dambayn se waan hellay, dhiig shubistiina waa la bilaabay…

Habeenkii oo dhan aniyo labadii hablood hooyaan dul fadhinay, ilaa ay waaberigii soo miyirsatay. Indhahay kala qaaday mase hadli karayn. Waxaa degdeg nalooga soo saaray qolkii, hooyona qolka qalliinka ayaa loo diyaariyay. dhakhaatiir badan oo is hor iyo daba yaacaysaaba way na dhaafeen , ugu dambaynna qol bay soo xidheen.

Laba saac iyo waxdheer bay meeshii ku jireen ilaa markii dambe ay kasoo faaruqeen. Markan waan badanahay, oo xaafadahii jaarka ayaa dad ka mid ahi garbahayga tuman yihiin.Dhakhtarkii nagu soo socday ayaan ku yaacnay, wuxuu isku dayay inuu na dejiyo. hal mar baa la wada aamusay markuu dibnaha furay, amar cid bixisay aan la garanayna loo hogaansamay- oo si toos ah afkiisuun loo daawaday.

Wuxuu galay khudbad dheer aad buuna u arartay, intaa uu hadlayeyba boqolaal fikradood oo taban ayaa maskaxdayda usoo baratamayay. Wuxuu khudbadiisii dheerayd kusoo

gunaanaday sidii uu kusoo dhamaaday hadalkii dheeraa ee islaantii iisoo jeedisay geeridii aabahay.
“Samir iyo iimaan adeer” ayuu aadyar iska yidhi. oohin iyo qaylaan isku daray, markaasaana miyir iigu dambaysay.

Siddeed iyo afartan saacadood koomaan ku jiray sida markii dambe lay sheegay. Indhaha kolkaan soo kala qaaday, waxan arkay dadka sariirta madax iyo minjaba fadhiya, oohin baanan la sara kacay. way i qabteen, dibna ii jiifiyeen.

ayaamaan kusii jiray cisbitaalkii, xaaladayduna hagaagsanayn. Waxa iigu murugada badnaa maalmihii dambe wuxuu ahaa anoo aan meydkii hooyo arag kuna sii samrin. Waxaas oo dhan oo igu dhacay waxaa i dabrayay wuxuu ahaa iimaankayga oo xoogganaa.

Si-yar baan cidladii ula qabsaday ayaamo badana keligay ayaan sii ooyay. Intaaba derisku way ila jireen, oo i barbar taagnaayeen. Cusbitaalkii waan ka baxay, dardaaran buu se dhakhtarkii isii faray .

“igu soo noqo si aan xaalkaga uga war hayo” ayuu igu sagootiyay.

Markii ugu horaysay xaafadii oo aan hooyo joogin ayaan irrida ka galay, alaabo yar-yara kasoo qaatay si aan u tago xaafada jaarkayaga, oo aanu sanado badan asxaab dhow

ahayn. Shay kasta oo xaafadda yaalaa xasuus gaar ah ayuu i gelinaya, maalmihii iftiinka badnaa ee noloshaydana dibbuu ii xasuusinaya.

Ma adaa Saddexdan qol dhex meeraysan karaya ayaan is idhi. Waan kaasoo baxay, dib u gelisteedana niyad uma hayn. adaan kuu dhiibee ma ag mari lahayd!

Wax allaale Wixii ila soo gudboonadaba taageera diyaar layla ahaa, muddo ayaana lay baxnaaninayay. Intii kumaan noqon dhakhtarkii, oo maxaan ka dooni bil iyo badhba maad tegin e!. haddana , wax Igu dhiiriyayba waxaan subax usoo kicitimay dhanka cusbitaalka. Soo dhoweyn aad u wanaagsan ayaan kala kulmay dhakhtarkii , cabbaara wuu i waraystay. Dabadeed dhiigayga ayuu cabbiray , dhiig in layga qaado ayuu amray, waxyaalo kale oo aanan garanayna wuu u sheegay inantii dhiigga iga qaadaysay.

Wuu iisii sheekeeyay culays maskaxeed oo badan iga fududeeyay. ugu dambayna usbuuc ayuu ballankayagii dambe u qabtay.

Waa Usbuuc kale oo aanan shaqo tegin, xaafadayadiina ag marin. Sariirta qolkan lay dhex dhigay ayaan weheshaday, mar walbana laabanahay. Xaafaddan aan joogo oo dhami maaweelintayda ayay isu xil saartay.

Qalbi wanaag iyo naxariis saa'id ahna way ii muujiyeen. Haddana kelinimo ayaan dareemayay, in cidla ciirsi la' gabal iigu dhacayna way ila ahayd.

Maqane-joogaan badanka ahaa , iyadoo hadal lay wado ayaan caalam kale ka shixi jiray; Mar dambe ayaan ku hambabari jirey badhtanka sheekada. "HAA ama Haye-na " iska odhan jiray.

Saaka waxaan diyaar u ahay inaan booqdo isla cusbitaalkii aan usbuucii hore ballanka ku lahaa. Waan soo gaadhay. soo dhoweyn aan tii hore ka yarayna waan kala kulmay. wuxuu iiga waraystay xaalkayga, warbixin koobana waan siiyay. Dabadeed , wuxuu ii guda galay inuu iiga warramo axwaashayda iyo in layga baahanyahay inaan sidan wax kabedelo " miisaankaagu hoos buu udhacay adeero" sidan naftaadaad ku waxyeelaynay… talo bixino kaloo badan oo hab-nololeedkayga inaan wax ka bedelo ah ayuu iisoo jeediyay .

Ugu dambeyanna wuxuu I yidhi " adeer, waxaan kaloo doonaya inaan kuu sheego xaalad cusub oo caafimaadkaga ku saabsan ee diyaar ma u tahay in aan kula wadaago? "HAA"ayaan cod hoose ku idhi anoo naxsan. arar dheer ayuu ii galay caafimaadka qofka iyo sida marba xaaladi ulasoo gudboonaato ayuu ku dheeraaday. hadalkiisii isagoo sii wata ayuu yidhi " maaha xaalad culus waa xanuun

bulshadu khalad fahanto haddii aad siduu yahay ula dhaqantidna waa mid lala noolaan karo.

Maalintii aan dhiigaaga tijaabinay si aad hooyo ugu shubtid ayaan xaqiijinay, intaana inaad soo degtaan kula sugaynay. " HIV- virus ayaa dhiigaaga laga helay".

intaa markuu yidhi wixii ka dambeeyay aniga iima uu wadin. Miyirkaygu ma joogin mana maqnayn. Ilmada ayaa iga socotay, waxaan hiinraagga iyo dhugta wadnahayga ahaynna ma maqlayn.

kelmada"AIDS" ayaa maskaxdayda kusoo dhacday, dabcan hore waan u maqlay maantase waa si kale. Maad iyo dad xun ayaan sawiran jiray, maanta se, si ka duwan sidii hore ayaan uga fekerayaa.

Waxaan is waydiinayay xaggeed ka inkaarantahay? Waa maxay waxan lagaa goynayaa ? ma labadaadi waalid eed keligood adduunka ka eeganaysaad weyday? Ma maantaa adna xanuunkii dunida u darraa lagugu sheegay AYAANKAAGU DARANAA!!

Intaasoo suaalood iyo ka badanba naftaydaan ku holcinayay. intaaba dhakhtarku wuxuu igula dikriyayay waano iyo waxsheeg . codkiisuunbaan se maqlayee wuxuu

leeyahay wallay iga tahay! Maalintaa anoo sidii u ooyaya ayuu gaadhigiisa igu soo qaaday, xaafaddana i keenay. Meel baan is duubay oohin waxaan ahaynna waan iska waayay.

Mar lay waydiiyay sababta aan la ooyayo waxaan ku jawaabo ayaan garan waayay, siday macquul u tahay inaan ku idhaahdo AIDS ayaa la iga helay? Ma anaa ku dhaca! waxaan isku dayay inaan been u sheego kuna maaweeliyo Hooyo ayaan geerideedi soo xasuustay.
Niyadda ayay ii dejiyeen, dab aanay se damin karayn ayay bakhtiintiisa u biyo dhaansanayaan.

Wel-wel iyo walbahaar baa ila soo gudboonaaday. hurdada qof caafimaad qabaa seexda waa run biyo kama dhibcaan ah. qof jiifa oon laba indhood isu keenin baan ahaaday. Cuntada madaxyga lasoo dhigaa way is gaadhi jirtey. Aamateedbaa wax lagu cunaa iyana waa xaqiiq e tii hore ka daba gee.

Habeenku sidii hore waa ka dheer yahay, dharaartuna iima dhaanto. hurdo aan markaba heli jiray ayaan baryo ku raadinaya. Maskaxdayda ayaan ka dalbanaya inay iga xidho bogaggan foosha xun ee ay ii rogrogayso. Anigoo marba dhinac isu rogaya ayaa waagu ii baryaa, maalintuna sidaa ku bilaabata.

Nafta is dhaafi ayaan dhowr goor ku fekeray haddana waan cabsaday. Muran baa iga dhex aloosmay, rejona iyada waan dhigay.

Suaalaha aan ka ledi waayay waxaa ugu horraysay xaggee baad xanuunkan ka qaaday? Ma doonayo anoon ogaan in aan dhinto. Cidda keliya ee aan xog waafiya ka helayaana waa isla ninkii ii sheegay mawdkayga!

Geesinimo ayaan iska baadhay subax horena dhakhtarkii ayaan ku kallahay, si aan usoo waraysto, xaqiiqooyin qarsoonna daaha uga soo qaado.

Diyaar waxaan u ahay inaan kusoo nefiso , suaalo badana nafta kaga soo jaro. Markaan soo gaadhayba wuu isoo dhoweeyay, markan se diyaar uma ihi . Quus baanan taagnahay.

waxaan weydiiyay kuna soo qaddimay sideen xanuunkan ku qaaday? hore ayuu iigu soo fadhiistay isagoo leh "Hagaag, dhowr siyood ba waa suurtogal adeero". "oo side ah" baan ku celiyay, aamusbuuna galay. "xaas ma tihid sowmaha" ayuu yidhi, waan se dareemay inuu ogaan u maraataynayo. Maya ,ayaan kaga jawaabay.

Aamus kale dabadii, "Miyuu jiraa qof aad galmo wada samayseen?" ayuu igaga nixiyay. Indho kulul ayaan ku eegay. sidee buu ugu dhiiraday inuu naftayda suaashaa nacasnimada leh kula dhaco. Hooyaday suubban iyo tarbiyadeedii ma anaa meel kaga dhaca? af adagaa oo suaal

xumaa wuxu! Awoodda aan jawaabtaa ku bixinayo in aanan lahayn ayaan xaqiiqsaday. Maya ayaan iyana kaga gaabsaday.

Wuu kacay, daqiiqado koobanoon is idhi wuu ugu talo galayna iga baxay. Markuu soo noqdayba wuxuu guda galay sharraxaadda xanuunka iyo sida lagu kala qaado. In Hooyadu ilmaha u gudbiso ayuu ii sheegay, galmada oo ta ugu badanna wuu ku gudbaa ayuu iigu daray; Waxa soo raaca dhiig lagugu shubo iyo qalab ama biro ku sara ayuu iiguso geba-gebeeyay.

Muddo ayaan kala aamusnayn oo midkayoba uu islaha bilow haddalka. nafta ayaan hawl-gal dheer u diray, maskaxdana wax badan daaliyay. Intaa uu sheegayba mid aan u banbaxay hore waan u xasuusan waayay.
SUG ! ayaan lasoo booday, wuu naxay.“Maxaa dhacayna” yidhi.
“IRBAD, HAA IRBADDII!!” ayaan idhi. Amakaag baa usii kordhay
“IRBADDEE?” ayuu iigu hal celiyay.

Waxaan u soo bilaabay shaqadayda iyo cusbitaalkan ka xoogsan jiray, reerkana biil-ka uga soo saari jirey. Nadiifiso mushahar fiican qaadata in aan ahaa ayaan u sheegay.

Anigoo ilmaynaya ayaan xasuusta dib ugu celiyay maalintii aabbahay aad ka u xanuusanayay, duhurkii hooyo iiso sheegtay iyo kaarkii igu kordhay ayaan si kooban ugu dulmaray.

Waxa jiray baan ku idhi, *irbado dul saara miiskii aan markaa nadiifiniyay, Maskaxdayda oo gurigii joogta aabbona ka werwersan ayaa hawshii degdeg ku qabatay, miiska oo irbado saran yihiinna Haab-haabtay. dabool haddaan is idhi irbaddii furkeedii yaraa ayaan la waayay. Irbadda ilaa lafta aroortayna waan ku war helay. Qolkii iigu dhowaa oo aan markaa shaqo badani kasocon ayaan caawimo u raadsaday, si fududna waa lay daweeyay, dhiigiina loo joojiyay oo ballastar! lagu dhejiyay fartii, ayaan ugu gebagebeeyay.*

HAAH ! buu yidhi , wataa haddaba halka lagaa raacay. " wax dawooyin oo ka hor tag miyaad qaadatay?" naqas isaga le'eg ayaan debeda usoo tuuray, cod dhiirrana ku idhi" ma qaadan". waxaanan ugu sababeeyay annoo ku degdegayay xanuunka aabbo ee markaa laysoo sheegay.

Waan ogaaday halka layga raacay maxayse soo kordhinay? Yaan eersadaa imminka , cusbitaalkii ma u tagaa oo irbad aad leedihiin baan AIDS ka qaaday ma idhaa? Yaa se waxaa iga dhegaysanaya, cidda doqonimadaa u diyaari wa ayo ? Maya, diyaar uma tihid culays intaa ka badan ayaan naftayda kula xanshashaqay. Anoo fekeraya ayuu igaga

naxsaday “ adeer nasashaad u baahantahay , xaalkaagoo dhan baan la socday. Xanuunkan waa lala noolaan karaa sidaan horeba kuugu sheegay, Waa hadba sidaad ula tacaashid . wixii daawo iyo taageero ahi waa dhankayaga ee adna yeelista halagaa helo. isoo booqo sida ugu dhakhsa badan si aan kuugu bilaabo dawooyinka wixii aad u baahatidna haygala xishoon.

Ayaamo kale oo mugdi badan ayaan Kusii dhex jiray. dunida oo dhan in lasoo duubay furaashkayguna ka hadhsanyahay ayaan u haystay . minaaradda masaajidka ii dhow oo igu beeganayd ayaan dhowr goor ka maqlay khudbado qiyaamaha ku saabsan. Aniga se qiyaamahaygu inuu hore u dhacay ayaan aaminsanaa.

Saddex todobobaad maan tegin cusbitaalkii. waxaan ka maraataynayay in xanuunku igusii kordho. Intaaba naftaan been ku maslaxayay. subaxan se waan isa soo khasbay. mucjisadu waxay tahay irrida cusbitaalka markaan marayay ayaan ku war helay indhaha igaga soo maqan Laba kalkaaliso oo barbar iga taagnaa, iyo codadka hoose ee aan kala saaridooda ku wareeray. Dareen baa igalay ah in warkayga la hayo. waan sii naxay runtii cida u sheegtay na waan garan waayay. Dadkan waxba kama qarsoomaan, wax sir xafidid la yidhaana dhexdooda waa ka sheeko baraleey iyo waxba kama jiraan.

Dhakhtarkii dawooyin buu ii qoray , noloshaydiina wuu kafaalo qaatay maadaama aan ka tegay shaqadii hore ee nadiifinta.

Waxaan sidii ku noolaadoba warkaygu wuxuu gaadhay xaafaddaan degganaa. quruumaha u xilsaaran war faafinta ayaan baadhistooda isku hawlay, mase garan. Takooris badan ayaan xaafaddii kala kulmay, naftaydiina dayac aan yaraynbaa lasoo gudboonaaday.

Galab dhexdaasa oon muraayada hor istaagay waxaan noqday qof labaad oo is-barasho isaga baahan. Naftaan waqti dheer daryeelkeeda ku lumin jiray maanta waa mid si walba u dacdarraysan. Sheekooyin badan oo bulshadu igu been abuuratay ayaan ka ledi waayay. waxa ugu naxdin badnaa " hooyadeed waxay u dhimatay kadib markay ka naxday xanuunka helay iyo edeb darrada ay ku kacday !" waxaan is waydiiyay maanta hadday hooyo nooshahay maxay ku odhan lahayd ? mooyi, ma hubo, kollay se iyaga way ii dhaami lahayd!

Xaafaddii waan ka tegay, mid aad iiga durugsan islaan habaryar iigu beegani deggantahayna waan u guuray. Cidla ayay ahayd meel koone ah ku taalla. Dhaleecaynta inaan kaga dhuunto ayaan usoo sahansaday. Codka dugaaga ayaa isu bixi jiray habeenkii. Dhegaysiga codadkaa ayaan ka

door bidiyay kan dadka. mararka qaarra waxaaban isku hawli jiray la sheekaysigooda iyagoon i maqlayn. Dhakhtarkii miyaa? waxaa dawladdu ku wareejisay degmo kale.

sidan ayay noloshaydu u daalaa-dhacaysay tan iyo wakhtigaa, ilaa iminkana cid aan eersado ma garanayo.

***

Axmed aad buu u naxay is beddelkana wejigiisaan ka dareemay. Intaa aan sheekaynayayba ilmada ayuu dhabankiisa ka masaxayay. waa markii u horraysay ee aan dhakhtar ooyaya arko! in ammina oo uu aamusna kadib wuxu yidhi " aad baan uga xumahay waxa kugu dhacay. dhibta oo dhanna waan kula dareemaya. Waxaan hubaa inay tahay imtixaan lagu tijaabinayo sabirkaaga. waxaan diyaar u ahay wax kasta oo aad u baahatid inaan kula garab istaago, dhinacyo badana kaa saacido". Intaa markuu yidhi ayaa niyad-sami i gashay. habdhaqankiisaa dhakhtarkii hore bara dhaafiyay ayaan aad ula dhacay. Sagootin wanaagsan ayuu ii sameeyay.
waan soo luuday ilaa xaafadaydii cidlada badnayd.

Waqtiga cadawgayga koowaad inuu yahay ayaan aaminsanahay. Gaabintiisa umma baahni, xawaaruhuu igu dhaafi jiray ayaamahygii farxadda hadduu iminkana kusocon lahaa, waan u mahadnaqi lahaa. Habeenku hawgu darnaado, il-gibidhlayn ayuu igaga tagaa anoon hurdo ku salaaxin.Qaadiro ayaan subaxa la toosaa. Waa sidaa meertadaydu.

Galabnimo ayaan Axmed u imid, isagoo dhoollacadynaya taleefana dhegta ku haya ayuu ii ishaaray inaan fadhiisto. Ujeedkaygu soo qaadashada dawooyin ayay ahayd, aragiisana waan ugu dhuumanayay. Il-bidhiqsiyo kadibba wuu dhigay taleefankii,weji furanna igusoo wajahay. Xaalkayguu warsaday , in aan fiicanahayna waan u sheegay.

Dabadeed, wuxu igu yidhi war farxad leh ayaan doonaya inaaan kula wadaago "berri waa Meherkayga waxaan jeclaystay inaan kuu sheego in habeen dambe xafladdu qabsoomayso. kasoo qaybgalkaagu waa ii muhiim ee hoo kaadhkaa, xejisona.

Ma qiyaasi karayo ereyadaasi siday ii damqeen. Dhowr il-bidhiqsi ayaan suaalo aan tiro yarayn isku waydiiyay. Waxaad dhisaysay ma khiyaal buu ahaa ? maxaad filaysay awel ? iminka sidani ma ka dhabaa , oo meherkaagay farxad ka heli ayuu isleeyahay? miyuu kugu ciyaarayaa tolow? waxaasoo dhan jawaabahooda ma hayo, waxaanse foolkiisa ka arkaa in aanu kaftamayn. Kaadhkii ayaan ka qabsaday anoo dhoollacadayn muujinaya, qalbiga se holac igaga shidnayahay.

Nasiib darrada i haysataan garan la'ahay. Suaalahan naftaydu isku xiijisay jawaab la'aantooda ayaa wax walba igaga daran. Maxaan galabsaday ? dunidan lix iyo labaatankii sanno ee aan caafimaadka ku noolaa waxa igaga culus toddobadaa bilood ee qamarku igu dhacay.

Hal shamac ayaa naftayda u shidnaa , kiina galabta ayaa duufaan ka culus oo bilaa jiho ahi ku kacday. Imminka waa saq dhexe. sidii caadada ahayd ayaan nafta la khalwaynaya . meherka axmed ee habeen dambe dhacaya ayaa maskaxdaydan yar ka waynaaday, oo ay ku mashquulsantahay. Maka qaybgashaa ayaan is waydiiyay**. "MAYA! , miyaad waalantahay! Haddaa miyaad miyir qabtaa! Maxaad waalli dhaantaa !"** is-diiddooyinkaasan isugu jaawaabay.

Waxaan la yaabaa dad in laga tiro badan yahay ku dooda. kuwaasi caawa iga sed roon. MA IYAGAA II DHOWBA ! bulsho ahaan haddii loo takooray anigu kelinimaan taaganahay. iyagoo kooxo ah, wax walbana qabsan kara ayay cawdaan. Toodu waa bilaash caawa!

Ilayskii ii sii bidhbidhayay sow duufaani may damin? waxa keliyeen caawa hubaa waa in aan dhimashada diyaar u ahay, daqiiqadaha soo socdana wax walbaa waa suurtagal!

***

Keligay ayaa halkan fadhiya. Feker ayaan dhabanada hayaa. Mar waan dhoolla cadaynayaa, marna yaab ayaa foolkayga laga akhrisan karayaa. Maskaxda ayaa suaalo is waydiinaysa. Xasuuso aanan rabin inaan dib ugu laabto ayay igu khasbaysaa. imase naxdin gelinayso xasuustaasi, inkastooy xanuun badantahay.

Wakhtigu is bedeli ogaa, waayuhuna yaab badana ogaa! ma naftii asqowdee aah-deedu baxaysaa, dib usoo arrimisoo, aduunyada u talinay? ma run baa sidani iminka? ma sanadkii todobaad baa caawa! ma halgankii iyo naf huriddii aadmi baad caawa midhihiisa guranay?!

Qolkan hoolka ka gaarka ah ee aan dhex fadhiyo ayaan hadba doc eegayaa. sida loo sharraxay iyo waqtiga la geliyay ayaan isku yar hawlay. Kollay ayaamo waa lagu mashquulsanaa. Shay walba oo dhex yaalla macna gaar ah ayuu ii samaynaya, farxadna wadnahayga xadantaynayaa.

Kursiga ayaan dib ugu fadhiyay, koob biyo ah oo aan gacanta midig ku hayayna kabbasho ayaan la damacsanaa kahor inta aanay indhahaygu qaban sawirka ku dhegsan

wajahadayda. Hore ayaan usoo fadhiistay sidii oo aanan weligayba arag, indhaha ayaanan ka dhex bixiyay.

Saddex qof oo dhoolla cadaynaya ayaa ka dhex muuqda. Midi waa aniga , wiilkayga dhexda ku jira iyo aabbihii. Muddo ayaan sawirkan arkayay, caawa se maxaan sidan ugu dhuganayaa? maxaan indhaha ugu dusiyay een ugu dhaygagay? Waa maxay Humaagga madaw ee ka dambeeyaa! si gaar ah ayaan sawirkayga ugu fiirsaday. muuqaalkaygii faraxsanaa ayaan ka dhex baxay. Mise waa dhoollacadayntii oo murugo qallibtay. Waa maxay waxani! Ilmadan socotaana maxay ahayd!

Mugdiga ka dambeeyaa sawirku wuxuu i xasuusinaya, dibna iigu celinaya tagto xanuun badnayd. waa ayaamahii tiiraanyadu hadhaysay naftayda. waa maalmo aan cid iyo ciirsiba la'aa. waa ammin aan jeclaysanayay ka faaruqista aduunkan. Waa ayaamo aan tabnaan mooye tognaan is daynay. Waa usbuucyo iyo bilo uur-kutaalo uun aan la noola. Maskaxdaydu xasuustaa ayay si bilaa ku tala gal u ah u dhex qaaday.

…Xaafadda xidhiidhkayagu ma wanaagsanayn, wada-hadal aan badnayna waa naga dhexeeyay. Subaxba-subaxa ka dambaysa in sannad loo socdo ayaa quluubtoodu iga sii durkaysay. qol gaar ah ayaa laygu cidleeyay, sheeddana laygala hadli jiray. Halkaas ayaan dhaleecaynta kaga dhuuman jiray, sida tuuggana cuntada laysoo dhigo

dhuumasho ku liqi jiray. sidaas ayaa maalmo, usbuucyo iyo biloba igu dhaafi jireen.

Anigoo culaysyadaa dhabarka iyo dhafoorkayguba qaadi la'yihiin ayaan noolaa, rejona naawilayay. Dawooyin aan kula tacaalo naftan bixi weyday ayaan qaadanayay, Axmedna galbahay iga go'do ka doonan jiray. Araga iyo dhoollacaddayntiisa ayaan naf ka dooni jiray.

Galabnimadii aan u tegay ma xasuusata , Haa dheh. waa galabtii wadhi-du iga raacday, ee waxaanan uga fadhiyin igaga soo bexeen. Waakii aadyar iska yidhi meherkayga kasoo qayb gal kaadhkana gacanta iiga dhiibay. Umal ayaa gebi ahaantay i saaqday. Bal qiyaas qof qol madow lagu xidhay , dalool yarra oo iftiin uga soo gelayayna laga awday. Anigoo illmadu i hibitiqayso, dhimashona u diyaar ah ayaan kasoo huleelay xaafadana soo abbaaray.

Qolkaygii ayaan sidii caadada ahayd ku keliyaystay, fulaynimo iyo ka fekerka mawdka oo aan waqti dheer ku qaatay ayaa dib ii dhigay. Ilmada iga socotay waxay ahayd sidii biyo isaga imanaya laba webi oo isu ooman. Sanqadha wadnahayga iyo hiinraagga iga baxayayna mawjado isu ciil qaba uga cabbir qaado.

saacado kadib ayaa qolka laygu soo garaacay.Waa habo, hore ayay usoo socotay casho ay ii siddayna madaxyga dhigtay. May noqon ee way soo fadhiisatay, indhaheedana

kuwayga ku beegtay. In weli naxariisi iigu hadhay ayaan dareemay, waxaanan sii ta'kiidiyay markay gacanteeda dhabakayga marisay ilmadiina ka masaxday.

Ereyo niyad dhis u badnaa ayay habeenkaa i tidhi. Naftayda culayska intaa le'eg inaan dulsaarin ayay igula talisay. Qaddarka iyo eebbuhu wuxuu qoray inaan la gefayna way iigu dartay. Erey walbaa afkeeda markuu ka dhammaado suaalo ayaan u hayay, cidda kula dhacaysaa se wa ayo. yaa iigu odhanaya haddii xanuunku qaddar yahay maxaad ii takoorteen? culayska aan naftayda saaray ee aad uga tudheen se waa kee! bulshadan oo dhan denbigaan ka galay muxuu yahay ? wehel maxaad iigu noqon weydeen?

Suaalaha iyo boqolaal kale ayaan u hayaa awooddu se meeday. Midh maan weydiin, iyana hadalkeedii ayay sii wadatay. Waxaanay kusoo koobtay "Habo, waxa jirta xarun lagu daryeelo dadka xanuunkan la nool,adeegyo caafimaad, waxbarasho iyo kuwo kale oo badana ay ka helaan. Halkaas ayaan maalin dhoweyd tegay xogo badana kasoo helay, taadana u bandhigay. waxay ii sheegeen inay kusoo dhoweynayaan oo ay waajibkooda tahay daryeel inay ku siiyaan".

Yaab ayaa ii sii kordhay waxaanan waxbadan iska waydiiyay xaruntaasi. Ma runbaa oo waxan habo sheegayso waa ka dhab, mise waa uun takooristii oo heer caalami sii

noqotay. Wax iga yeedhsiiyayba HAA ayaan ugu jawaabay, iyadoo dhoollacadynaysana way iga baxday.

Wax badan baan sii falanqeeyay intii ay iga tagtay ilaa waagu ka dilaacayay. Hurdo ha sheegin oo iyada beryahaaba ismaanu aqoon. Sawiradii maskaxdayda soo marayay ayaan marba mid faaleeyay. Madaxii aan habo u ruxayay iskaga dhaqaajin uun buu ahaa e mawduucu si fiican iiguma dhicin. Waxa keliya ee igu soo mir-kacayay wuxuu ahaa jacaylkii axmed. Waxaan shaki gelinayay miyir qabkayga, sidee ayaad u jeclaatay qof caafimaad qaba oo fay ah?! kollay caadi ma tihid ayaan hoos isu idhi. Haa oo caadi ma jiro, jacaylkaa laftiisuna iga waali cas.

Waagii baa beryay. Codadka kala gaarka ah ee subaxuna dhegahayga ayay soo gaadhayeen. Habo ayaa soo gashay qolkii, salaan kadibna weelkii madaxyga yaalay ayay iga qaaday. Daqiiqado hadday iga maqnay quraac diirran ayay isoo hordhigtay. “ diyaar garow saacad kadib baynu baxaynaa” ayay igu tidhi.

Wax aan diyaariyaaba may jirin runtii. toban daqiiqo igumay qaadan inaan shandad yar ku ururiyo maryo aan haystay. Wax kale oo aan qaato ma garanayn oo meeshan dhex yaalay.

Saacad kadibba Habo ayaan is raacnay. Xaruntii ay ii sheegaysay ayaan soo abbaaray, muddo waxaan soo caga

jiidnona waan soo gaadhnay. Ganjeel weyn oo qorrax dhaca u jeeda ayaan kasoo gallay. Gaadhkii oo albaabka taagan ayay weydiisay in xafiiska cidi joogto. Il-bidhiqsiyo ayuu naga maqna, markuu soo noqdaayna " soo socda" yidhi.

waan is daba galay ilaa aan xafiiskii tagnay. nin dub cad ayaa fadhiyay, iyo ninkale oo soomali ah. Dabcan soomaaligu waa turjumaan shaqadiisa aad u yaqaana afmiishaarna ah. Hadal badnidiisu shaki bay ku gelinay ah inuu been sheegayo, hadalka ninka cadna wax ku darayo.

Habo ayaa hadalkii bilowday una sharraxday xaaladayda iyo waxa aan ku suganahay. War-bixin kooban dabadeed , ninkii caddaanka ahaa ayaa hadlay turjumaankiina farriintan noogu soo dhiibay. Wuxu yidhi " xaruntani waxay u heellan tahay inay dhibanayaasha xanuunka AIDS-KA caawimaad dhan walba ah u fidiso. Ma jirto wax mushqaayada oo aanu ku qaadano adeegayaga. Keliyaata sidaanu bulshadan nolol ka duwan tan cuslaysay ugu samayn lahayn ayaan u heellanahay. idinna waan idinku soo dhoweynaya xaruntan waqti walba".

Hadalo kale ayay habo isa sii waydaarsadeen, is-afgarasho se waxay noqotay in lay geeyo qolkayga cusub ee aan dhismayaashan badan ku yeelan doono. Sii fadhiya ayay na dheheen, muddo aan badnayna way naga maqnaayeen.

Yimaade. waardiyihii meesha ayaa laygu soo daray, si uu qolkaygii i geeyona wuu i horkacay. Habo iyada halkii ayaan isku soo sagootinay, waano iyo dardaaran aan yarayna subaxaa way iiga tagtay.

Qaabka meeshan loo dhisay iyo fooqyadan waaweyn ee iska soo horjeeda ayaan la ashqaraarsanaa. Mid qudhi kumuu ool xaafadii isku-raranka ahayd ee aan muddada dheer ku noola. Waan soo soconay kana soo fogaanay albaabkaan kasoo gallay. in yar baan ku hakaday dabaqii iga sarreeyayna kor u eegay mise laba nin ayaa xaggaa sare nagasoo khaawisaya. Indhihii ayaan degdeg ugala booday, beer aanay kolkii hore u jeedina ku mashquuliyay. Misaan haddana wajahadayda eegay, waardiyihii oo Inuu i raagsaday ka muuqato ayaa halkaa iga soo eegaya, Soo dheeree ayaan indhihiisa ka akhristay, orodkaanan hoosta kasoo xaday ilaa aan soo gaadhay.

Dabaqaan hoos maraynay luuq dhexdiisa ah ayaan ka dusnay, bidixna u laabanay oo qayb kale kusoo baxnay.

“ waa tooskaa ee inna keen ” ayuu yidhi. kala fogaa meeshanna socod baaba loogu dhiman ayaan hoostaa ka leeyahay. Ugu dambayn , waxaan soo gaadhnay albaabkii qaybta cusub laga gelayay. riixisti albaabka waxa noo xigtay jaranjartii u horraysay inaan fuullay. Dhismaha qaybtiisa labaad ayaan soo gaadhnay, jaranjartii markaan

ka dhamaanay, laba qolna dhaafnay ayaan kii saddexaad hor istaagnay.

Albaabka ayuu si dhowrisi ka muuqato u garaacay, ilbidhiqsiyo kadibna gabadh baa na hortaagnayd. Indho qariib nagumay eegin oo waxaan dareemay in sheekadayda hore loo sii dhameeyay qolkan iyo inantanna lay qorsheeyay.

Salaan diirran kadib qolkii ayaan hore u galnay. Indhaha ayaan la raacraacay qolkii, gidaaradiina indhaha mariyay. wax saa u badani ma oollin aan ka ahayn sariiraha labada ah ee iska soo horjeeda, miiska weyn ee buugtu saarantahay albaabkana dhinac yaalla iyo daahyada lagu gudbay fallaadhaha cadceeda ee daaqada kasoo gelaya.

“soo dhowoow qariibnimo kuma dareemi doontid halkan” ayay igu tidhi. Waan u dhoola cadeeyay anoo uga mahadcelinaya qalbi wanaagga ay ii muujisay. Isbarasho kooban baa na dhex martay magacayga wanaagsan ee AMAL ayaan usheegay, iyana bushaaro ayay ii sheegatay. Tilmaamo kooban bay i siisay oo ku saabsan qolka, suuliga iyo waxyaalihii kale ee ay muhiimka u arkaysay.

Sariir aan dareemay inay ii diyaarsantahay ayaan dulfadhiistay, muddo ayaanan sidii u dul fadhiyay. ma taag darri bay iga ahayd, mise deegaanka cusub baan saluugayay mid ay ahayd ma xasuusto iminka. bushaaro

way iga baxday si ay iigu doonto waxaan cuno. Kahorse intaanay tegin ayay igu tidhi " qolku waa qolkaagii fadlan qariibnimo ha dareemin, uma joogno halkanna inaan ku cidloono!"

Firfircooni baan iska baadhay alaabtaydiina meel ku habaystay. jidh si walba u daalanaa ayaan biyo soo dul orodsiiyay. intaan maydhashada ku maqnaaba bushaaro way soo noqotay, cunto diirranna miiska ayay ii sii saartay. daqiiqado kadibba cuntadiiba baan faraha kula jiray, anoon ka dherginna waan ka farashaxay. dhammayso hadday igu dirqisayna waan ka diiday. dhaqanka ayaan dhowrayay ee runtii cunto laga faraxasho may ahayn.

Bushaaro kumay dhiirran inay iga waraysato xaaladayda caafimaad, suaalaha ku taagan se wejigeeda ayaa laga akhrisan karayay. Qof furfurnaan u dhalatay waqtigu se ka hiiliyay ayay ahayd, waxay ii diiday inaan qaloodo oo kelinimo labaad dareemo. Marba sheeko ayay igu habtay iyadoo og inaan aamus laasimay, oo HII iyo Haye mooyee aanan waxkale ku darsanayn.

Ugu dambayn waxay ii sheegtay in meeshu leedahay qayb waxbarasho oo subaxa la galo. fasalo kala duwan inay jiraan ayay ii raacisay " Asxaab kaloo badan ayaad baran doontaa berri " ayay tidhi. Macalimiin ajaanib iyo soomaali isugu jirta inay meesha dhigto waxbay iiga taabatay. Hore u seexo si aynu u kallahno, haddii aad wax u baahatidna

hayga xishoon" ayay iigu khatimtay. Waan u mahadceliyay habeen wanaagsanna u rajeeyay.

Waa markii iigu horraysay ee aan seexanayo meel aan gurigayagii iyo kuwii ehelada toona ahayn. Saacad iyo dheeraad baa kasoo wareegtay markaan bushaaro wada hadlaynay. Kollay iminka hurdo wacan bay ku jirtaa. Anigu se mawjado ayaan dhex qaadayay. Fekerba mid buu iisii dhiibayay, noloshana wax badan ayaan ka faallaynayay. Waxaan kala kulmi doono noloshan cusub ee aan bilaabayo ayaan maanka ku yar mashquuliyay, mase helin wax jawaab ah. waxay ahayd sidii qof badda dhinac kasoo galay dhamaynta baaxad wayntaana isku hawlaya.

Waxaan haddba dhinac isu rogo, hurdo aan hore uga quustay u baadhona codka diiga ayaan ku war helay. Naftaan ku khasbay inay indhaha is geliso hurdana ku yar qirto. Saacado kooban kadibba codadka subaxa ee kala duwan ayaan maqlayay. Meeshani uma buuq badna sidii xaafadaan ku koray , xaafadii aan iyadoo siraadan waaberiisan jiray, buuqa iyo sawaxnkuna nolol maalmeedkayga ka mid ahaa. si walba way uga jabaq yartahay mase garan waayaysid in waagu beryay.

Bushaaro ayaa qolka dhex maraysay maalinteedana diyaar garow ugu jirtay. " subax wanaagsan" ayay igu salaantay.

" wanaagsan" ayaan u celiyay.

Degdegbaa ka muuqday iyo diyaar garow dheeraad ah oo ay maalinteeda ugu jirtay.

Salaad subax markaan tukaday bushaaraan isasoo raacnay dabaqaan saarnayna qaybtiisa hoose nimid. Quraac ayaan xaggii ka cunnay, kadibna socodkayagii sii wadanay. Socod aan ka yarayn kii shalay ee gaadhku meeshan igu keenay ayaan bilownay. Qayb kaloo cusub ayaan tagnay gudahana u gallay. Waxay ii sheegtay inaan xafiiska soo marayno si aan waraaq ugasoo qaadano. soo dhoweyn ayaan kala kulanay xafiiskii, hordhac kooban ayay bushaari iga siisay ninkii fadhiyay. Hore ayuuba xogtayda usii hayay, warqad cadayn ah oo aan fasalka ku dhex fadhiisan karona wuu siiyay. Sidii baan kaga soo baxnay.

Wehelkaygii cusbaa ayaan soo daba galay, ugu dambayna Fasalkii ayaan hortiisa soo istaagnay. Idankii gelitaanka haddaan dalbanay waxa naloo ogolaaday inaan soo gallo. Horaanu usoo soconay, fasalkii ayaan isha degdeg ugusoo wareejiyay markiibana waxa ii muuqday meel hablo dhowr ahi fadhiyeen. xaggii ayaan isku qaaday una taabacay.

Badhtanka markaan marayay ayaan dareemay inaan Bushaaro ila socon. dib ayaan jalleecay mise macalinkii ayay dheeg taagantahay. Way ii baaqday iyadoo dhoollacdaynaysa , anoo wadnuhu i dhug leeyahaan dib usoo noqday.

Saaxiibaday hadal ayay bilowday markaan soo dheeg istaagay. waxay u sheegtay–waabay iska arkayeene–inaan meesha ku cusubahay. Magacayga ayay u raacisay inay isoo dhoweeyaana way ka dalbatay. Anigu intaaba hoos ayaan eegayay marka laga yimaado isha oo aan haddba dhinac ku xadayay. Macalinkii ayaa isna hadlay oo yidhi

" Ardayeey aan qalbi furan kusoo dhoweyno walaasheenna cusub". Sacab ayaa xigay iyo cod mid ah oo ay kor u qaadeen hal marra kuwada dhawaaqeen " kusoo dhowoow fasalka, fadlan qariibnimo ha dareemin uma joogno halkanna inaan cidloono!" waxan miyaa la wada qaybsiiyay ayaan hoostaa ka lahaa.

laba kursi oo isku xiga ayaan fadhiisanay, dugsigaygii yaraantii aan dhigan jiray ayaan halkaana ku xasuustay. tan iyo uuladaydii safka hore ayaan fadhiisan jiray. waxaan xasuustaa macalinkaygii taariikhda ii dhigi jiray mar uu odhan jiray adigu aradada waad ka duwantahay, maskaxna ilaahay waakugu manaystay. Suaalaha joogtada ah ee aan ka jawaabi jiray, kaalmaha hore ee aan iskuulka ka geli jiray iyo qiimayno kale oo badan ayuu daliishanayay.

Maalin ayuu suaal si jamac ah noo waydiiyay, mustaqbalka iyo waxaanu rejaynayno inaanu noqono. qofkii ugu horeeyay ee ka jawaaba ayaan ahaa, maadama aan macalinka hor fadhiyayna sidii caadada ahayd ayuu dhankayga soo jalleecay. Aamus yar dabadii **"**

Hoggaamiso" ayaan ku idhi. Ardaydii oo dhan baa igu qososhay. waan cadhooday runtii hoosna waan u jeestay. Macalinkii oo inta ardaydu buuqaysayba aamusnaa ayaa intuu kor ula hadlay yidhi " dhegaysata, qof kasta waxbuu jecelyahay inuu noqdo mustaqbalka laabtana ku hayaa. Mid kastoo idinka mida oo raadceeya wuxuu jecelyahay, dedaalna ku bixiyaa wuu gaadhi, amalna waa suurtagal!"

Dhiirigelin ka wayni ma jirto marka macalinkaagu ardada kaaga hiiliyo si uu dareenkaaga u ilaaliyo. Maalintaa waxa xasuustaa igu celiyay waa muddadaa dheer ee fasal aan dhex fadhiisto iigu dambaysay iyo guradan dambee ay ku jirto qoftii macalinku u hanwaynaa.

Maadadii macalinku waday oo ahayd xirfadaha iyo la xidhiidhka bulshada wuu soo afmeeray, fasaxna noo ogolaaday. Debedda ayaan u soo baxnay arday badanna meel wada fadhiisanay. Waan la yaabanaa runtii, dadkan inaan isku xaalad nahay waan ogsoonaa, waxaanse weligay igusoo dhicin in qof xanuunkan la nooli dhoolacadayn karo.

Dad wada faraxsan , kaftamaya, mararka qaara fara-ka-ciyaaraya ayay ahaayeen. Dad nolol u diyaar ah ayay ahaayeen. dhowr jeer oo ay indho la-yaab igu soo eegeen dhoolacadayn aan qalbiga sii jirin ayaan iskaga waabiyay.

Maalintaasi waxay ii ahayd mid si walba uga gedisan maalmo badan oo aan soo maray. Casarkii ayaan beeraha meesha ku teedsan soo tamashlaynay, bushaarona sheekooyin qurxoon igu jalbeebinaysay. dhowr habloodoo kale ayaa socodka nagu weheliyay. midkayona ma rabin inuu ka kale waydiiyo sida uu meeshan ku yimid, jawigana ka jiidho.

Durba waqti aan raagsan jiray ayaan dareemayaa inuu iga cararayo. qorraxdii ayaa naga libidhay, dhammaantayona dhismahayagii ayaan nimi. Caways kale ayaan sii gallay, misana aniyo bushaari qolkayagii usii gudubnay .

Caawadan si walba way iiga duwantahay kuwii hore, weji mugdi hadheeyay ayaa cadceedi usoo bidhaamaysaa. Bal qiyaas farxadda naf xabsi ku jirtaty oo xoriyadeedii maalmo yari uga hadhsanyihiin. in badan ayaan anoo jiifa duni kale socod ku marayay. mustaqbalkaan xalay shakiga gelinayay ayaan isla caawaba wax ka saadaalin karayaa. waa duniyo xaalkeed.

Habeenku wuu igu dheeraaday runtii, waxa keliya ee aan doonayay degdegana u rabay wuxuu ahaa in waagu baryo, fasalkaygii cusbaana dhex tago. Waan seexday hurdo xasiloon, riyooyin qurxoon oo wada caddina ka buuxeen. Malaha waa mustaqbalkii ifayee aan ka fekerayay. Yaa garan kara!

Waa' labaad baa ii baryay. sidii aan shalay ku qaabilay si ka niyad san ayaan usoo dhoweeyay. Haddii shalay ay caga jiid iga ahayd, saakaba waaniga xawaaraynaya. waanigan xitaa quraacdii sidii beri laba jeer cantuugay. bushaaro oo ku faraxsan is bedelka korkayga ka muuqda ayaan sidii laba carruura oo hooyadood madrasadda u dirtay wada duullay, dhankii fasalkana abbaaray.

Masaafadii fogayd maanta ma jirto oo daqiiqado yar kaddiba albaabkii fasalka ayaan taagnayn. Intaanan gelin ayay bushaari iyadoo farta laba kursi oo macalinkaba hoos yaal ku fiiqaysa tidhi " maanta safkaygii baad ila fadhiisanay eeku tala gal, waakuwaa labada kursi xaggaa inooga banaan". Waan yar naxsanaa , sidii shalay se maan ahayn. Waan ku dhiirraday inaan fadhiisto bartii ay ii tilmaamaysay.

Maalin cusub, maaddo kaloo cusub luuqadahana ku saabsanayd iyo macallin cusub ayay noo ahayd. Waxa keliya ee aan yar karhayay ayaa ahaaa barashada joogtada ah ee macalin kastaa kaa doonayay. Markiiba indhaha macalinka cusubi waxay qabteen kuwayga wuuna i kiciyay isagoo magacayga i waydiinaya. Waan usheegay iskana fadhiistay kadib idinkiisii.

Maalintaana waxaan soo wada qaadanay waqti wacan kana wanaagsan intuu doono kii shalay. Naftaba in dib laysoo geliyay ayaan moodayay. Naf aamus dishooday ayaan bushmaha u furay sidii ubaxa. Kahorse waxaan dib u baranayay ereyada qaar aan ilaaway muddo badan oo aan hadalka ka soomana. Ilmo yar oo ururSanaya kelmadaha deegaanka ku xeeran ayaan ka dhignaa.

Kaftan ayaan marba mid iyo laba asxaabta ku tuurayay, iyana qosol iyo dacaayad ayay isugu kay darayeen. Durba nolol aan udgoonkeeda sida saxansaxada roobka ku raaxaysanayo ayaan galay. Bal sawiro qof jiilaal daba dheeraaday ku jiray oo dhibcihii roobka ugu horeeyay madaxiisa qooyeen. Waxaad kaloo suuraysataa qof xilli habeenimo oo dabaylo iyo duufaano xooggani dhacayeen dooni ku dhex marayay badda baaxaddaad ogtahay leh, oo u soo dhowaaday ilayska berriga.

Sawiro sidoo kale guuraha habeenimo qof ku hallaabay oo habar dugaagna codad kala duwan dhinacyadiisa ka bixinayso, cid iyo ciirsi toona aanu jirin oo ku soo baxay reer meel degan, goor aan geed iyo qof la kala saarayn.

Muuqaaladaa oo dhan naftaydan casar liiqa joogtay ayaa ka dhignayd. Naftan bixi wayday geerida se diyaarka u ahayd baa waxaasoo dhan la mid ah. Inta jeer ee aan sigtay adba waad ogtahay. Maalintaa aan joogay si walba maalmihii tegay way uga duwanayd, udugga maalmaha soo socdana

lama qiyaasi karo kol haddii labadii cisho ee u horeeyayba laydh caafimaad i martay. Ma qiyaasi karayn farxaddii wejigii qurxoonaan jiray nuurka usoo celisay. Sidii wax waalan baan isleeyahay kor maw qaylisaa oo ma tidhaa:

" waan faraxasanahay !! waan faraxsanahay !!".

Anoo dhex mushaaxaya muuqaaladaa qurxoon asxaabtana waqti la qaadanaya ayaan ku baraarugay macalinkii aan xiisadiisa wax yar kahor kasoo baxnay noogu jiray oo meel aan dhawr tallaabo iga durugsanayn soo socda. Wuu nasoo gaadhay bariido kadibna intuu isoo eegay igu yidhi " fadlan xafiiska iisoo raac". Waan sara kacay, soona daba galay ilaa aan soo gaadhnay xafiiskiisii. " soo fadhiiso halkan" ayuu yidhi. mahadcelin kadibna sharaxaad kooban ayuu ii galay isagoo iiga bilaabay " magacaygu waa Mahdi , waxaan ka dhigaa meeshan luuqadaha , waxaan kaloo u qaabilsanahay isku xidhka ardayda iyo la socodsiinta waxa kasoo kordha ururka gacanta ku haya. Sidaa darteed , arday walba oo meeshan jooga xil gaar ah baa iga saran xaqna wuxuu u leeyahay inuu ogaado kana qayb qaato isbedelka meesha ka dhacaya. Adna qaybtaada waad qaadan doontaa " ayuu iiguso gebagebeeyay isagoo dhoolacaddayn wejigiisa ku bilaya.

Intaa ka dib shuruucda meesha oo daabacan ayuu isoo siiyay, warqadna xogahaygii aan u sheegay iyo kuwo habo ay hore uga waraysteenba wuu ku buuxiyay.

Waan uga mahadnaqay warbixinta anigoo usii jihaysan dhankii aan kasoo galay. Asxaabtii ayaan ku noqday. bushaaro ayaan wejigeeda ka dareemay inay iga rabto waxaan lasoo kulmay, waan isasoo raacnay intaan jidka soo soconayna waxaan uga sheekeeyay sida wax u dheceen. waa sax bay tidhi, qofkasta oo ku cusub sidaasaa loogu soo dhoweeyaa macluumaadkaana loola socodsiiyaa. Way sii wadday ammaanta macalinkana ku dheeraatay " waa macalinka meesha nagu hayay intii aan joognay, rejo weyn ayuu na geliyay runtii. Mid kasta oo naga mid ahna ahmiyadda uu leeyahay ayuu dareensiiyaa. Waxa la doorta cidda hogaaminaysa sannadka soo socda ururka ardayda halkan joogta, gacan weyna wuu siiya qofka xilkaa qabta " ayay tidhi.

Qolkayagii ayaan gaadhnay duhurkiina qorraxda kaga soo dhuumanay. Casarkii ayay bushaari ii keentay dharka kubbada lagu ciyaaro, runtii waan la yaabbana waxanay ku kacayso. waan ka diiday markii hore oo hadda miyaan yeeli laa! meel laga maroba maan garanayn. Waxaan isku dayay inaan ku qanciyo inaan daawanayo keliya galbaha kalena la ciyaari doono , igamay dhegaysane way igu dirqisay.

Aakhirkii dharkii ayaan soo qaatay, galabtaana garoon hablaha u gaar ah ayaan kubadda gacanta isku soo eryanay. Fiidkii anagoo gataati-dhac ah ayaan qolkayagii nimid, casho yar oo aan diyaariyayna wada cunnay kadib mid walbaa sariirteedii isku tuurtay.

Usbuucyo badan baa tegay, waqtigu wuu is gurayaa, Farxadda badankeediina soo laabatay. Dad isjecel kolkaad ku dhex nooshahay naxariis baa ku saaqaysa, neecaw udgoona waad nuugaysaa. Xiisado badan ayaan qaadanay, macalimiintayaduna waxay isku dayeen inay dhinac kasta oo nolosha ah wax naga tusaan. Waa naloo hagar baxayay, waxkasta oo aan u baahanona Haye in la odhanayo ayaan sii ogayn.

Dhowrkii toddobaadba waxa mar soo booqda xarunta masuuliyiin ka tirsan ururka meeshan gacanta ku haya. Dhowaan in bulsho badani na sugayso ayay noo sheegaan. mid maalin khudbad noo jeediyay waxaan hadalkiisii ka xasuustaa :

“ sidaad ogtihiin dadka inta xanuunkan la heshiisay waxa ka badan inta cadawga ka dhigtay, inta bulshada ku dhex jirta ee aan sheegan inay la noolyihiinna tiro ma leh. Takoorida saayidka ah iyo dayacaadda dhanka bulshada idankaga timi waa ta keentay in halkan laydinku xareeyo, ee bulshooyinka kale sidan ma aha.Masuuliyad baa idin saaran maadaamoo wax laydin baray, qoysas badan oo xanuunkan la nool baa idin sugaya , carruuro derbi jiif oo waalidiintoodii xanuunkan u dhinteen ayaa idiin baahan. Waxaasoo dhan iyo wax kabadan ba diyaar inaad u ahaataan ayaa laydinka baahan yahay. Berri ka maalin,

intiina u diyaarka ahi meeshan waad ka bixi doontaan , badhkiin macalimiin bay halkan iyo meelo kaleba ka noqon doonaan,qaarkalena meelo kale ayay nololo kale ka abuuran doonaan. Wax badan diyaar u ahaada dedaalkana ogsoonaada".

Waxa noo raacayay oo aannu markasta helaynay dawooyinka hoos u dhiga taranka Virus-ka. sidii dad caadiya ayaan u noolayn, wax u baranaynay ,nafahaygana u maamulaynay. Isku filaanshiiyo inaan gaadhno, saaxiibna la noqono xanuunka ayaa naloo tabbabaray, waqti badana la geliyay.

Tabbabaro dheeraada baanu hellay iyo jaanis waxbarasho oo fiican. bushaaro oo ah qofka aan odhan karayo ololaha-rejo-soo-celintayda ayay doorka u weyn ku leedahay ayaan waqtiga badankiisa wada qaadanaa. Yaraantaydii keligay baan ahaa, lamaan dhalan walaalo aan weheshado , wada ciyaarno waxna wada qaybsano sida carruuraha kale. Maantase kelmadahaa inaan ku tawaawaco dembi ayaan u arkaa.

Waxay igu garab istaagtay wax walba oo aan u baahnaa markii aan ugu tabarta darraa. Si gaar ah ayaan maalin isu xaal waraysanay , waayahaygii nololeed ayaa ugasoo warramay iyo sida aadka u fudud ee aan xanuunka ku

qaaday. In badan bay ilmada ila jiibisay, qosolla iigu bedeshay oo tidhi " ayaamihii ku dhaafay yay kaa mashquulin kuwan qurxoon eed ku nooshahay" waa qof karti iyo adayg u dhalatay runtii. Xanuunka siday ku qaaday ayaan mar waydiiyay, wejigeedu ayaan ka araky murugaada hadhaysay. waan ka maagay inaan xasuuso dib u geliyo, werwer hor lehna horseed ugu noqdo.

Buugaagta miiska qolka u saaran ayay inta badan waqtigeeda ku qaadata . Ayaamihii horoo dhan waan la yaabi jirey. Waxaan u haystay inay iskaga mashquulinayso xaqiiqada hortaala. Runtu se malahayga way ka fogayd. dabeecad cajiiba ayay i bartay. Xaqiiqooyin kale ayaad faalanaysaa , rogrogaysaa wax macno lehna kala soo baxaysaa. Dad kale ayaad la noolanaysa adoon idin uga qaadan. duni ay dawaafideedu waqti kugu qaadan lahaydna saacadad ku maraysaa. Waxaan odhan karayaa buugtaasina saami aan yarayn bay ku lahaayeen ololihii bushaaro boqollaydiisa badan lahayd.

Subaxnimo ayaan fasalkii kusoo kallahnay, sidii caadada ahaydna duruustii qaadanay. Waa macalin Mahdi oo casharkiisa xamaasad gaar ah loo hayo. Waxbadan maanta ma dhigin , keliyaata waraaqo ayuu noo qaybshay markuu waxyar fasalka ku jiray.qaybo ayuu noo kala saaray meelo kala duwanna wuu na fadhiisiyay, si aan wadar ahaan ugu shaqayno. Koox ayuu madax iiga dhigay, warqadahiina iigu dhiibay. Muddo ayaan rogrognay oo ka doodnay

suaalo adkaa , oo ku saabsanaa maaraynta iyo sida loo waajihi karo nolosha dad badan, oo mid kamida daraasadihii ugu dambeeyay sheegeen inay xanuunkan la noolyihiin.

Markiiba waan habeeyay kooxdaydii , takhdiidna waxaan u dejinay dibu-dejinta dadkaa iyo nidaamkii loo waajihi lahaa. Waqtigii naloo qabtay wuu dhammaaday, warqadihiina waa nalaka ururiyay, dabadeedna fasax ayaan gallay. Usbuuc kadib ayaan helay hambalyada nooga timid maamulka sare, oo soo bogaadiyay shaxdii aan u dejinay dadkii dhibaataysnaa. Kooxdaydii baa guulaysatay. aan idhaahdo mayee waan wada guulaysannay maadamoo maqsadku badbaadinta dadkuun ahaa.

Maalintaa laga bilaabo il gaara ayaa laygu eegay, oo awood qarsoon ayaa laygu tuhmay. dhowr jeer baa macalinku hawlo adag ii xilsaaray, anna hawl-karnimaan muujiyay.

Kala wareegii sanadka ayay ahayd , Bil keliyaata ayaana ka hadhsanayd qabashada doorasha-sanadeedka loo qabto cidda haynaysa maamulka ururka dhibanayaasha u adeega.

Maamulkaasi wuxuu awood u leeyahay inuu ka qaybqaato shirar caalami ah ,oo ururka guud ee Dhibanayaasha Aids-ku qabtaan dadkaana maarayntooda lagaga arrinsado.

Sannadkii u dambeeyay Aadam oo dedaal iyo karti dheeraada u dhashay ayaa hogaaminayay. Kan soo socdana

lama garanayo inuu sii haysanayo iyo in cidi beddeli doonto.

Subaxnimo Axada anigoo asxaabta waqti la qaadanaya ayaa dalab iiga yimid xafiiska macalin Mahdi. Markaan u tegay soo dhoweyn kadib wuxuu hadal iiga bilaabay

“ waad ogtahay ururkeennu sannad walba inuu doorasho qabto, waxa innaga xigaa waa saddex todobaad. Markaa, waxaan kugula talin lahaa inaad ka mid noqotid u tartamayaasha”. Kedis ayay igu noqotay runtii wax culus oo aan qaadi karinna way iila muuqatay. jagadaa culus iskumaan wadin , suaal se ayaan is waydiiyay ah :

-suurtagal ma noqon kartaa?.

Anoon weli ka jawaabin ayuu igu yidhi “ waad kasoo fekeri kartaa arrinkan,qaado waqtigaaga jawaabtana igu soo celi”.

bushaaro ayaan habeenimadii u sheegay arrinka macalinku iiso bandhigay, waxkaleba imay odhan aan ahayn “ dee maxaad sugi markaa ?!”

way igusii adkaysay, habeenkaa se wax goaan ah anoon gaadhin, kase fekeraya waxaan fali lahaa ayaan seexday.Subaxnimadii dambe ayaan kacay diyaarna u noqday la kulanka Mahdi, macalinkayga. Waxaan ugu tegay xafiiskii salaam diirran ayaan is waydiirsanay, isagoo u muuqda jawaab gaar ah inuu iga sugayo ayuu yidhi

Hayeh Amal. “ waan soo rogrogay taladaadii , diyaarna waan u ahay inaan u tartamo jagadaa” ayaan ku idhi. Bravo! ayuu yidhi. waan hubaa inaad waxbadana qaban doontid, waxna meeshan ka bedeli doontid.

Waqtigu wuxuu is guroba maalmo kooban ayaa ka hadhsanaa doorashadii , saddex qofoo keliya ayaa soo gudbistay warqadda u tartamista jagada sanadlaha ah. Waa aniga , gudoomiyihii hore Aadam iyo muxammad oo isna ka tirsana xubnihii firfircoonaa ee Aadam la shaqayn jiray.

Runtii ma jirin xifaaltan saayida iyo is-barbar orodka jagooyinkan oo kale looga bartay , kii soo baxaba mid naga mida ayaan u arkaynay. Ayaamaha waxa qaybaha kala duwan ee deegaankayaga aad looga hadal hayay doorashadan soo socota, isbeddelka iman doonana waa la naawilayay. Keliyaata hal usbuuc ayaa naga xigay.

Laba cishoo keliya ayaa ka hadhsan doorashadii , waxa laysugu yeedhay rag iyo dumar intii meesha joogtay , Hall-weynna lasoo fadhiisiyay. Saddexdaydii tartame , maamulkii meesha iyo madaxda sare ururka ka socotayba waxaan fadhinay meel ka sarraysa halka ehelkaygii la soo tubay. Waxa hordhac ahaan loo siiyay in hogaamiyii sanadlaha ahaa maalinta salaasada la dooran doono , waxa xigay khudbado koobnaa oo midkasta oo naga mid ahi

kusoo bandhigayay wuxuu qaban doono. Aadam iyo Axmed markii ay dhammaysteen ayaa anna lay yeedhay. Hortooda ayaan soo istaagay. Indhaha ayaan mariyay intaanan hadal. anoo dhowranaya daqiiqadaha kooban ee lay siiyayna waxaan ku bilaabay :

“ waan idin salaamay kolka hore , waad ogtihiin waxaynu dhibanayaal u nahay xanuun saaxiibtinimo leh, dadku se khalad fahmeen. hakala duwanaato siyaalaha lagu kala qaado. Kumanaan qof ayaa u dhibtoonaya waxaanay galabsan. Kumanaanka carruur ah ee waalidiintood ku dhashay ee la dayacay kadib dhimashadii waalidiintoda, derbiyadana jiifaa maxay geysteen? boqolaalka kale ee sidayda irbadaha iyo agabka kale ee ka qaadayna maxay galabsadeen? si kastaba aynu ku qaadno e waxaan u baahanahay in aan daryeel dheeraada siinno nafaheena la takooray sida waxshinnimada lehna loola dhaqmay. Sidaa Si lamid ah, kuwa cawaanka ah ee inna takoorayna waa inaan badbaadinaa , kana badbaadinaa kumanaanka xanuunka qaba ee u halliilaya inay qaadsiiyaan. Wax badan baa qabyo ah , wadajir ahaan waxaan u baahanahay inaan wax wada qabsanno bulshadana waxkusoo kordhino , mustaqbalka dhow xitaa diyaarinta dawooyin cidhib tira virus-ka inaan abbuuro ayaa laynooga baahanyahay, kuwan maantana horumarin ku samayno. Wada noolaanshaha bulshada inaan ka shaqayno ayaa inna sugaysa. Hawlo badanbaa inoo yaal,

ugu horayn, waa inaan garano in layna sugayo. ilaah idamkiina waxbadan inaan innoo qabto ayaan rajaynayaa haddii aad ii igmataan".

Sidaasay khudbadahayagii ku soo dhammaadeen, goobtiina loogu kala dareeray.

Subaxnimadii salaasada ayaa la gaadhay, doorashadiina waqti badanba may qaadan. Xubno madax banaan oo maamulka doorashada gacanta ku hayay ayaa waqtiga ku dhawaaqista shaaciyay. Shir ballaadhan oo mar labaad lasoo agaasimayna waxa laga shaaciyay qofka ku guulaystay hogaaminta sanadka soo socda. Aniga ayuu noqday qofkiina. Sawaxanku meeshu cirkaasuu marayay, Asxaabtaydiina duco iyo hambalyo badan ayaan kala kulmay.

Xilkii ayaan kala wareegay Aadam , sidii ayaanan ku ahaa gudoomiyaha ururka, hawlo kuwaygii ka culusna iila soo gudboonaadeen.

Bilo ayaa kasoo wareegay intaan xilka hayay, waxaan ka dhexeeyay dhigashada cilmiga iyo safarro koob-kooban oo aanu ku bixi jiray aniga iyo xubnahaygu. Si joogta ah waxaan u hawl galloba Fasax kooban ayaan qaatay xaruntaydiina nasasho ku joogay.

***

Galab roobban ayaan aniga iyo bushaaro oo dhex lugaynayna beerta weyn, ee aan wax badan ka durugsanayn meeshan aan deganahay isku soo baxnay Mahdi. Bariido kooban kadib lugtii ayaan isku darsanay, kaftan koobanna is waydaarsanay. Isla markiiba saaxiibaday ayaa degdeg bilowday ishaartayna inay wax soo iloowday oo dib u noqonayso. Way isu kaaya daysay, socodkiina waan sii wadanay.

Muddo haddaan is dhinac lugaynay oo kala aamusnayn ayuu cod-xabeebsaday Mahdi. IXIIX!, ayuu dhowr jeer ku celiyay dabadeedna yidhi “Arrin baa jira aan ku keliyaystay muddona keligay rogrogayay. Ma jirin wakhti ku habboon oo aynu kalano muddadaa aynu is naqaanay aan ka ahayn intaan xiisadda idiinku jiro.

Waan ku farxay galabta markaan arkay jawigan cuddoon adigoo dhex qaadaya; jawigan aad si walba isugu eegtihiin. ararta badan haddaan laba erey kusoo koobo:

“inanyahay kalgacalbaad, goortaan ku eegaba , qalbigayga gelisaa. ayaamkaaba dhankaaga ayaa lay jiidanayaa;

dabciga , kartida , dhiirananta iyo aqoontada ballaadhaniba waxay ii horseedeen ka fekerkaaga iyo hammuun badan oo aan agjoogaaga u qabo. Waan ku jecelahay!! ayuu kusoo afmeeray".

Waan naxay runtii arartiisa dheerina markasta indhahaygay dhulka kusii libdhinaysay. waan soo eegay waxaanan ku war helay " qaado wakhtigaaga wax degdeg ahi iminka ma jiraan". Ma garanayo waxaan kusii sagootiyay galabtaa. Hadal waan idhi wuxuu ahaa se ha i waydiin!

Fiidkii ayaan sidii caadada ahayd wakhti dheer bushaaro la qaatay, arrinkii galabtana u sheegay. aadbay usoo dhoweysay talona igu siisay inaan ku dhiirado aqbalaada. Wax jawaab ah maan siin. ma garanayn waxaan ku idhaahdo waxaanse hubay inaan dareenadana qalbigayga cabudhinayay.

Habeenno ayaa kasoo wareegay wakhtiguna waa ordayay. maalin kale ayaan is aragnay Mahdi , bariido diirran kadibna wuxu iydhi *" wakhtigaa dheeri wuu I dilaya"* anoo dhoolacadeeya ayaan ku idhi *" hore u dhiman mayside ha werwerin".* Is afgarasho ayay noogu dhamaatay, mid walbaana dhankiisa inaan looga soo dhicin ayaan isu dhaarsanay.

Laba qofoo is ilaashanaya ayaan ahayn, galbo iyo cawayso bilan ayaan wada qaadanay. Farxad inbadan na seegtayna dib ayaan ka qallaynay. ifka inaan isu tudhno ayaan isu ballansanay.

Naftii quusta taagnayd maalin walba albaab farxadeed baa u furmayay. waagii baryaba waxaan wanaag ahayn ma filan jirin. Mahdigaygii ayaan habeeno badan cawayska wada shidanay. dalka dibadiisa ayuu ku barbaaray aqoon badana ka taransaday. Xanuunka inuu ku dhashay ayuu ii sheegay, caawinta dadka u dhibanna wuu goaansaday. iimaanka ayaa qanjaha jooga qaddarka eebbena wuu ku qancay.

Muddo ayaan wada soconay, go'anna waxaan ku gaadhnay yagleelidda hoy aan kaga nasanno dacdarrada iyo naaraha dunidan.

Qorshe iyo qabanqaabo ayaa la galay, madax iyo maamul arrinkii ayaan ogaysiinay. Asxaabtuna diyaarinta iyo isku dubaridka arrinkan naadirka ah ayay u heellanaayeen.

Wakhti badan oon gallay kadib habeenkaygii baan soo gaadhnay, aroos aan hore loo aragna xaruntayadii ayuu ka dhacay. Farxaddaydii markaa wuxuunbaan ku qiyaasi karaa albaabada jannada ee lasheego in mid naloo furay. Janna adduun hadday jirtona inaan keligay ku jiro ayaan aaminsanaa.

Bilo aan farxad ku naaloonaynay ayaa tegay. waxaan ka aargoosanayay ayaamihii ilmada, nashaad badanna waan dareemayay. Waxaa noo dheera labadayaba hawlaha adagee aannu wadnay. Anigu ururadii ayaan isku dubba ridayay, safarro koobanna u baxayay. hawlo badan ayaan usbuuc kasta qaban jiray, dad aan tiro yarayna waan la kulmi jirray urur ahaan.

Mahdi isagu hawshii xarunta gudeheeda ayuu gacanta ku hayay, sidoo kale dhigistiisii ayuu sii watay. Mar ayuu se goaansaday inuu ku noqdo Sweden, oo uu kolkii horeba degganaa. Halkaa ayuu sidii uu horeba u samayn jiray hawlihi kasii waday, xarumihii ururadana ku hayay. Anigu safarrada aan u baxo badi afrika gudaheeda ayay ahaayeen, xarumaha u waaweyn ee aan dhowrkii usbuuc ba in marla booqdaa ay lagama maarmaan ahayd waxaa ka mid ahaa: xafiiska u weyn ee nayjeeriya, waxa kusoo xigay kuwa koonfur afrika iyo kiiniya.

Hawlaha adag intaan ku jiray daal iyo tacab badan ayaan dareemay, waanse ku faraxsanaa inaan u adeegayo dad aad u tabar daran. tusaale inaan u noqdo kumanaan carruur ah oon waxba galabsan , iyo dad anoo kale ah oo la nool xanuunka ayaan diyaar u ahaa.

Waqtigii uurkayga ayaa soo dhowaaday, culayskuna wuu igu sii saayiday. Mahdi wuxuu igu adkeeyaba ugu dambeyn wuxuu igu qanciyay inaan soo baxo Sweden-na imaaddo. Waan ka yeelay Visa-na wuu iisoo saaray. Waxaanu iswaydiinay sida ilmahayagu uga badbaadi karo xanuunkan, isagoo aan sadhoobinna loo keeni karo dunida buuqa!

Dhowr dhakhtar ayaan la kulanay talona waydiinay. Intuba waxay noo dhaafin waayeen in qalliin adag la gelayo, taxaddir badanna uu u baahanyahay. Waxay kaloo noo sheegeen in aanay jirin damaanad buuxda, ama boqoleey dhamaystiran in ilmahayagu xanuunka ka badbaadayo. Ma ay jirin waxkaloo aanu samaynaa, waanu ku qanacnay diyaarna u noqonay qalliinka. Bil kadibba waxaan jiifay cusbitaalkii laygu qalayay, waxa ila joogay takhasusyahankii jarmalka ahaa ee qalliinkan gelayay. Saacado kooban inuu qaadanayo ayaa naloo sheegay. duco ayaa dad badani ila garab taagnaayeen.

Qalliin saacado qaatay ayaa soo af go’ay laguna guulaystay. ilmihii yaraa oo wiil noqday AYAANLE ayaa loogu wanqalay; isla markii qalliinka lagu guulaystayna waxa lala gaadhay dawooyinka lidka ku ah virus-ka, kahor tag ahaanna loo siiyay. Saacado badan kadib waxa laga eegay dhiigiisa virus-ka, farxadda aan la wada qaylinay ayaa ahayd inuu “ negative” noqday. Kumaannu

kalsoonayn ee dhowr jeer oo dambe ayaa baadhitaano loo sameeyay. " negative-kaa" waxba iskama beddelayn.

farxadu hadday bar-dhammaad leedahay figteeda u sarraysa ayaan joognay. qoys dhinac walba u dhamaystiran , mahadnaqa eebbena afka ku haya ayaan ahayn.

Baxnaanin badan iyo nasasho dheer kadiba hawlahaygii ayaan u xiisooday, waa sidaa shaqadu markaad ku faraxsantahay. Firaaqada ayaad nacaysaa.

Dib ayaan u bilaabay hawlihii, safarkiise waan yareeyay oo dalkii aan usoo wareegay ayaan gudihiisa ka bilaabay.

Maalmaha , usbuucyada iyo biluhuba way ordayeen. Durba sanado ayaa tegay, deganaan iyo farxad sii siyaada mooyaane wax is dhimayay may jirin…..

……Xasuustaa kooban ayaan la ilmeeyay sawirkii Mahdi iyo ayaanlena indhaha kasoo celiyay. Koob biyo ah intaan dhowr jeer kabaday ayaan xaggii hoolkii xafladdu kasocotay usoo baxay. Safkii hore ee madaxda loo baneeyay ayaan fadhiistay, Mahdi iyo ayaanlena garab degay.

Muddo ayaa xafldadu socotay mahadnaq iyo bogaadina u badanayd. Ugu dambayntii ayaa lagu dhawaaqay magacaygii masraxana laygu yeedhay si lay gudoonsiiyo abaal marinta dadka ugu saamaynta badan dhanka naf hurista iyo taageerida aadmiga.

Taariikhda aadmiga Waa tii u horraysay ee qof noocayga ah la siiyo. Sawaxanka , sacabka iyo hugunka ka baxaya meesha ayaan iskala garan waayay. degdeg ayaanan ku gaadhay halkii aan dadka uga khudbayn lahaa.Cabbaar ayaan sugay intay sacabka joojinayeen, indhahana la raacraacay, misaan safkii hore labadaydii dheeman ka helay. Intaan ku dul bakhtiistay ayaan Hadalkii ku bilaabay: :

Waad mahadsantihiin. Waad mahadsantihiin in badan. ma doonayo inaan wakhti badan ku lumiyo taariikhdayda iyo waxaan qabtay, badi intiina halkan joogtaa waad ka dheregsantihiin oo meel uun baad ka daawateen , akhrideen, ama ugu yaraan intaad halkan fadhideen warqadaha kuraasta laydiin saaray ayaad wax ka akhrideen; amaba qof ka kugu xiga ayaad ka xansatay. Sidaa darteed, ma doonayo taariikhdayda mugdiga badani ka muuqdo inaan idiin bilaabo , ehel iyo dadkii aan jeclaa ee aan dunidan ku waayayna xasuustooda ku laabto. Mid se ayaan idinka codsanayaa, sidaa aad iminka niyadda iigu

dhisaysaan , sacabka iigu tumaysaan , jacaylkana iigu muujinaysaan ,waxa jirtay wakhti aan aad ugu baahnaa, dacdarro badanna i haysay. Wakhti aan keligay hoos u ooyayay, dhimashana diyaar u ahaa. Waxa heerkaa i gaadhsiiyayna wuxuu ahaa nacaybka bulshadii idinla midka ahayduun.

fadlan dadkan daryeel gaar ah u muujiya, jeclaada , takoorkana ka ilaaliya. Kuwaas ayaa intan aad ii muujiseen iyo ka badanba mudan, iyaga ayaanan caawa u hanneynayaa abaal marintan aad igu sharafteen

mahdsanidin mar labaad.